



Soobandhigidda Dhameystirka Heerka 2 ee Cusub ee Deeqaha kusaleysan Baahida!

Deeqda Dhameystirka Heerka 2 ee Early Achievers waa abaalmarin dheeraada oo ah \$250.00 oo loogu talagalay ka qaybgalayaasha Early Achievers ee soo dhamaystiray howlaha Heerka 2 iyo soo gudbinaya "Codsiga Heerka 2" ee MERIT inta u dhaxaysa Julaay 1, 2016 iyo Juun 1, 2017. Ujeedada abaalmarintaani waa inay ka taageeraan xarunta si ay isugu diyaariyaan qiimeynta, ilaa inta ay ka gaarayaan in lagu qiimeeyo Heerka 3.

Yaa u qalma?

Xarun kasta oo ka qaybgalaysa Early Achievers oo bixisa adeegyada qoysaska hela kaalmooyinka daryeelka carruurta ee gobolka, oo soo buuxiyay shuruudaha aasaasiga ah ee ay tahay in la sameeyo mudada ka horaysa inta aan la soo gudbin codsiga qiimeynta, oo sidoo kale loo yaqaan hawlaha Heerka 2, inta u dhaxaysa Julaay 1, 2016 iyo 1 Juun, 2017.

Sidee lagu heli karaa?

Adiga oo u soo gudbinaya Codsiga Early Achievers ee Heerka 2 MERIT, markii aad dhamaan hawlaha Heerka 2 dhamaystirto, inta u dhaxaysa Julaay 1, 2016 iyo Juun 1, 2017.

Maxaan u isticmaali karaa?

Waxaad u adeegsan kartaa lacagaha deeqda ah horumarinta manhajka, qalabka wax lagu barto, sahayda, qalabka wax lagu kaydiyo, qalabka howlaha firfircoonida/cayaarta jireeda iyo qalabka kale si kaga taageeraan horumarinta tayada.

Sidee habka codsiga u shaqeeyaa?

Looma baahana howsha codsiga! Marka Codsiga xarunta ee Heerka 2 ay ansixiso MERIT, oo la ansixiyo foomka W-9/libiyaha Gobolka Washington oo dhana (SWV) ee laga xareeyay Waaxda Waxbarashada Hore (DEL), xaruntu waxay u qalmi doontaa dhiirigelinta dhaqaale. Haddii aadan hubin inaad leedahay lambar SWV, waxaad ka eegi karta xogta online ka ah: <http://www.des.wa.gov/services/ContractingPurchasing/Business/VendorPay/Pages/VL.aspx>.

Haddii aadan lahayn lambar, mid ayaa lagu siin kara adigoo soo buuxinaya iyo soo diraya [foomka Hay'adda Bixiyaha Gobolka oo dhan/foomka W-9 oo dib ugu soo celi DEL](#). Fadlan ogsonoow: dhiirigelinta dhaqaale waa fursad hal mar ah oo aan la heli karin markii la dhaafto Juun.